Heshiiska Macmiilka OHP ee Bixinta Lacagta loogu talagalay Adeegyada Caafimaadka

Heshiiskani wuxuu u dhexeeyaa *Macmiilka* iyo *Daryeel Bixiyaha*, sida uu qeexayo OAR 410-120-0000 Macmiilku wuxuu oggol yahay in uu bixiyo lacagta adeegyada aysan caymiskooda bixin Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ama OHA qandaraaska la yeelatay ee daryeelka ururadu iska kaashadeen (MCE-yada).

Qaybta daryeel bixiyaha

① Daryeel bixiya foomkan buuxinaya waa *(mid calaamaddee):*

☐ Daryeel bixiyaha wax bixinaya *(daryeel bixiyaha bixinaya adeega)* ☐ Daryeel bixiyaha wax qoraya

☐ Isbitaalka ☐ Farmashiyaha ☐ Bixiyaha adeegyada taageero *(oo kale)*:

② Adeegyada la codsaday. Kuwaani waxaa ka mid ah, balse aaney ku koobneyn, daaweynta, qalabka, agabka iyo daawooyinka.

Astaamaha adeega *(CDT/CPT/HCPCS/NDC)*:

③ Taariikhda(aha) la filayo adeega *(haddii ay adeegyadu ay dhici doonaan dhowr bilood, fadlan sheeg inta jeer, oo wadata taariikhaha bilawga iyo dhammaadka):*

④ Xaalada la iska daaweeyay:

⑤ Kharashka la qiyaasay $ Ilaa $. *Calaamadee mid ka mid ah hadalada soo socda ee ku saabsan kharashkaasi:*

☐ Ma jiraan kharashyo kale oo qayb ka ah adeega(yada).

☐ Waxaa dhici karta in ay jiraan kharashyo kale. Waxaa dhici karta in aad bixiso lacagtooda, sidoo kale. Kharashyada kale ayay dhici kartaa in loogu talagalay (*(calaamadee dhamaan kuwa ku khuseeya):*

☐ Shaybaarka ☐ Raajatada ☐ Isbitaalka ☐ Daawada suuxdinta ☐ Kuwo kale:

⑥ ☐ Daryeel bixiyaha wax bixinaya ama qoraya ahaan:

- Waan isku dayay dhammaan daawenta caymiskeeda la bixiyo ee loogu talagalay xaaladaada.
- Waxaan xaqiijiyay in adeega(yada) la soo jeediyay aysan caymiskooda bixin xaaladaada.
- Waxaan kula socodsiiyay daawenta caymiskeeda la bixiyo ee loogu talagalay xaaladaada, waxaanad dooratay daaweyn aan caymiskeeda la bixin.

☐ Sida daryeel bixiye kasta oo kale *(calaamadee mid ka mid ah hadalada soo socda):*

☐ Waan fahamsanahay in daryeel bixiyuhu kaala hadlay waxyaabaha kale oo la kala dooran karo oo buuxiyay foomka *Heshiiska Bixinta Lacagta* oo gooni ah.

☐ Fadlan waxaad aragtaa daryeel bixiyahaaga si aad wax uga weydiiso kala doorashooyinka kale oo u buuxiso foomka *Heshiiska Bixinta Lacagta* oo gooni ah.

Magaca daryeel bixiyaha: NPI:

Saxiixa daryeel bixiyaha: Taariikhda:

Qaybta macmiilka OHP

⑦ Magaca macmiilka: Taariikhda Dhalasho (DOB): Lambarka Aqoonsiga Macmiilka:

⑧ Waxaan fahamsanahay kuwa soo socda, oo weli dooranayaa in aan helo adeega(yada) ee kor ku qoran:

- Adeegyada kor ku qoran caymiskooda ma bixiso OHP si lacag loo bixiyo ama qorshahaygu.
- Haddii aan helo adeeg waxaan oggolahay in aan bixiyo kharashyada. Ka dib yeelashada adeegyada, waxaan heli doonaa biilal ay tahay inaan bixiyo.
- Kala doorashooyinkayga kale, kuwaasi oo ku qoran foomkan xaggiisa dambe waxaa ii sharraxay daryeel bixiyahayga.

- Daaweynta caafimaad ahaan ku habboon ee aan yeelan karo, oo ay ku jiraan adeegyada OHA ama MCE ay dhici karta in ay bixiyaan.

Saxiixa macmiilka (ama wakiilka) – *Wakiilku waa in uu haystaa caddeynta awooda sharci si uu ugu saxiixo macmiilkani*

Taariikhda

Haddii uu saxiixay wakiilka daryeel bixiyuhu, halkan ku qor magaciisa:

⑨ Saxiixa markhaatiga: Taariikhda:

Magaca markhaatiga:

Heshiiskani wuxuu ansax yahay oo kaliya haddii kharashka la qiyaasay ee kor ku qorani uusan isbeddelin oo adeegyada lagu qorsheeyo muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo saxiixa qofka xubinta ah.

Macmiilka – Nuqulka foomkan diiwaan ahaan u hayso.

Ogeysiinta Macmiilka OHP – Macluumaadkani u akhri si taxaddar leh ka hor inta aadan saxiixin.

Ka hor inta aadan saxiixin waa in aad xaqiijisaa in adeeg kasta uusan bixin/daboolin OHP ama daryeelkaaga urruradu iska kaashadeen (CCO) ama qorshaha daryeelka la maareeyo. Halkan waxaa ku qoran waxyaabo aad samayn karto:

① ***Hubi in aad xaqiijiso in aan adeega caymiskiisa la bixin/daboolin***

OHA, CCO-gaaga ama qorshahaaga ayaa kuu soo diri doona Ogeysiinta Talaabo Qaadida haddii aysan bixin/daboolin adeeg uu daryeel bixiyahaagu codsado. Haddii aadan helin Ogeysiinta Talaabo Qaadida, ka codso CCO-gaaga, qorshahaaga ama daryeel bixiyahaaga in uu mid kuu soo diro si aad u xaqiijiso in aysan adeega caymiskiisa bixin/daboolin OHP.

② ***Codso Racfaan iyo ama Dacwad Dhageysi***

Marka aad haysato Ogeysiinta Talaabo Qaadida, waxaad codsan kartaa Rafcaan ama Dacwad Dhageysi. Si taxaddar leh u akhri Ogeysiinta Talaabo Qaadida. Waxay sharxi doontaa sababta loo diiday adeega. Waxay sidoo kale ku siin doontaa macluumaad ku saabsan xaqa aad u leedahay in aad rafcaan ka qaadato diidmada ama codsato dacwad dhageysi.

Haddii aad sidoo kale leedahay Medicare, waxaad yeelan kartaa xuquuqaha kale ee Racfaanka. Haddii aad leedahay Medicaid (OHP) iyo Medicare labbadoodaba, wac 800-Medicare (800-633-4227) ama TTY 711.

③ ***Hubi si aad u ogaato haddii ay jiraan siyaabo kale oo lagu helo adeeg***

Daryeel bixiyahaaga weydii haddii:

- Uu isku dayay dhammaan fursadaha kale ee caymis bixin ee la helayo ee loogu talagalay daaweynta xaaladaada.
- Ay jiraan isbitaal, dugsi caafimaad, hay'ad adeeg, xarun caafimaad oo lacag la'aan ah ama waaxda caafimaadka degaanka oo laga yaabo in ay bixiyaan adeegan, ama kaa caawiyaan in ay bixiyaan kharashkiisa.

Miyay faa'iidooyinkaaga OHP ama caymis caafimaad oo kasta oo kale ee ay dhici karta in aad leedahay, dhawaan isbeddelayaa? Haddii ay sidaas tahay, isku in day in aad ogaato haddii adeegani caymiskiisa la bixin doono marka faa'iidooyinkaagu isbeddelaan.

④ ***Weydii qiimaha adeega oo hoos loo dhigay ama lacag dhimis lagu sameeyay***

Daryeel bixiyahaaga weydii haddii uu ku siin karo qiimaha adeega oo hoos loo dhigay ama haddii uu bixin karo lacag dhimis loogu talagalay dadka shakhsi ahaan si gaar ah u bixinaya lacagta adeegyada. Waxaa dhici karta in aysan haysan wax ay ku siiyaan, laakiin ogaanmaysid adiga oo weydiiya maahane.

⑤ ***Waxaad heshaa ra'yi labaad***

Waxaa laga yaabaa in aad hesho daryeel bixiye kale oo kaa qaada lacag yar oo loogu talagalay adeega.

Kharashyada dheeraadka ah
Waxaa laga yaabaa in adeegyo laga helo daryeel bixiyayaal kale sida – adeegyada isbitaalka, daawada suuxdinta, daaweyn, shaybaar – oo la socda adeegyada aad rabto. Waxay noqonaysaa in aad bixiso kharashkani, sidoo kale. Daryeel bixiyahaaga weydii magacyada iyo lambarada telefoonka daryeel bixiyayaasha kale. La xiriir daryeel bixiyayaashani si aad u ogaato waxa ay tahay lacagta ay dadka ka qaadi doonaan.

Su'aalaha?

- Wac qorshahaaga ama waaxda Adeega Macmiilka CCO, ama
- Qaybta Adeega Macmiilka ee OHP ka wac 800-273-0557, TTY 711
- Khadka Gargaarka Dadweynaha ka wac 800-520-5292 haddii aad jeclaan lahayn talo sharci oo ku saabsan faa'iidooyinka OHP ama bixinta adeegyada.

Ogeysiinta Daryeel Bixiyaha – Xeerarka Maamulka Oregon Khuseeya (OAR-yada)

Shuruudaha Heshiiskani waxaa lagu tilmaamay OAR 410-120-1280, Biilasha, iyo 410-141-3540, Ilaalinta Qofka Xubinta ah. Xeerarkan waxaa laga heli karaa internet-ka https://secure.sos.state.or.us/oard/displayChapterRules.action?selectedChapter=87.